

Qorshaha Hawada ee Xilligga Qaboobaha (Winter)

Fadlan ogow in iskoollada Saint Paul Public Schools aynu si joogto ah u la soconno saadaasha hawada ee ay samayso [National Weather Service](#) si aan u gaarno go'aanka ugu habboon ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska.

Xiritaanka Iskoollada ee Qaboobaha

Guddoonka Saint Paul Public Schools wuxuu xiri doonaa dhammaan goobaha shaqada ee degmada, sidoo kalena waa la baajin fasallada iyo barnaamijyada sababo la xiriiro cimilada, dhaxan dabayl leh, baraf da'ay ama baraf sabiibax noqday, waddooyin khatar ah in gaariga lagu wado, ama xaalad cimilo oo xun.

Barnaamijyada la baajinayo waxaa ka mid ah:

- **Fasallada iyo dhammaan barnaamijyada iskoollada PreK-12**
- **Barnaamijka Early Childhood Special Education (ECSE)**
- **Barnaamijyada iyo ciyaaraha dhaco iskoolka ka hor iyo ka dibba** (Flipside, Community Education Youth Enrichment, Extended Day for Learning (EDL), iwm.)
- **Munaasabadaha iskoolka** (field trips, open houses, iyo shirarka macallinka iyo waalidka, iwm.)
- **Ciyaaraha waa la baajin. Ciyaaraha iyo tartannada waxaa go'aan looga gaaraa si gaar ah.** Jadwadlka isbeddellada waxaa lagu daabacaa bogga [spps.org/sports](#).
- **Waa la baajin dhammaan fasallada Community Education.** Wixii xog dheeraad ah, booqo [spps.org/commed](#).
 - Discovery Club
 - Early Childhood Family Education (ECFE)
 - Fasallada iyo barnaamijyada caruurta (aquatics, driver's education, iwm.)
 - Barnaamijyada iyo fasallada wax lagu baro dadka waaweyn
 - Barnaamijyada dadka waaweyn ee qabo baahiyaha gaarka sida (SEED, CLEAR, Culture Club, iwm.)
 - Hubbs Center
 - East Side Hub@Harding
 - Como Planetarium
- Dugsiyada sare ee habeenkii
- Barnaamijka Alternative to Expulsion program (A2E)
- **Hawlaha qoysaska lagaga qayb-gelinayo arrimaha iskoollada** (Parent Academy, Parent Advisory Council meetings, iwm.)
- **Waa la baajin haddii ay ururro iskuulka ka baxsan ay oggololaansho haystaan in ay dhismaha iskool Saint Paul ah ku qabsadaan shirar ama hawlo.** (YMCA, Girl Scouts, tutoring, iwm.) Kala xirii qabanqaabiyaha hawlahaan ururka wixii su'aalo ah.

Xiritaanka Iskool ee ay Sababtay Cimilada Qaboobaha

XAALADO QABOW

Xiritaanka uu sababo heer-kulka ama dabeyl dhaxan leh

- Iskuulka waa la baajin haddii ay saadaasha hawada ee 6 a.m. ee subaxa xiga sheegayso:
 - [Dabayl leh dhaxan](#) ka hosaysa -35 degree Fahrenheit **Ama**
 - Heer-kulka uu ka hooseeyo -25 degree Fahrenheit**
- Go'aanka xiritaanka iskuulka waxaa la gaarayaa ugu dambayn 6:30 p.m. habeenka ka horreeya xiritaanka.

XAALADO BARAF

Xiritaan uu sababo baraf da'ay ama mid dhalo noqday ama ay waddo ay khatar tahay in gaadiid lagu wado

- Iskuulka waa la baajin haddii baraf xoog leh yimaado oo uu sababo xaalad halis keenta oo aan saamaxaynin in basasku ku socdaalaan waddooyinka ama uu barafku ka xannibo in shaqaaluhu ay si nabdoon ku yimaadaan shaqada.
- Go'aanka xiritaanka waxaa la gaarayaa ugu dambayn 5 a.m. subaxa fasallada la joojinayo.

Baajinta Barnaamijyada Socdo Iskoolka ka dib Cimilada awgeed

Iskoollada Saint Paul waxay go'aansan karaan in la baajiyo hawlaha la qabto iskoolka ka dib sababo la xiriira hawada oo la filayo in ay sii xumaato maalin uu iskuulku furan yahay iyadoo ay xiisaduhu u baxayaan si caadi ah. *Wax isbeddel ah kuma imanayo barnaamijka duhurka ee Pre-K, iyo midka duhurka ee Early Childhood Special Education (ECSE), iyo fasalladi caadiga ku socday iskoolka ee subaxdii soo billawday.*

Barnaamijyada la baajinayo waxaa ka mid ah:

- **Barmaamijka After-schoolka iyo howlaha extra-curricular ah** (Flipside, Community Education Youth Enrichment, Extended Day for Learning (EDL), iwm.)
- **After-school events** (field trips, open houses, iyo shirarka macallinka iyo waalidka, iwm.)
- **Ciyaaraha waa la baajin. Ciyaaraha iyo tartannada waxaa go'aan looga gaaraa si gaar ah.** Jadwadlka isbeddellada waxaa lagu daabacaa bogga spps.org/sports.
- **Barmaamijka Discovery Club wuu ka furnaan doonaa dhammaan goobaha uu ka jiro ilaa ardayda oo idil loo kaxeeyo guriga.**
- **Fasallada iyo hawlaha hoose ee Community Education waa la baajin.** Wixii xog dheeraad ah booqo spps.org/commed.
 - Fasallada iyo barnaamijyada caruurta (aquatics, driver's education, iwm.)
 - Barnaamijka Early Childhood Family Education (ECFE)
- **Barnaamijyada kale ee Community Education ee la baajin doono waxaa loo eegayaa mid mid iyo si gaar ah.** Si gooni ah ula xiriir barnaamijka ama booqo spps.org/commed.
 - Barnaamijyada iyo fasallada wax lagu baro dadka waaweyn
 - Barnaamijyada dadka waaweyn ee qabo baahiyaha gaarka sida (SEED, CLEAR, Culture Club, iwm.)
 - Hubbs Center - Adult Basic Education (ABE)
 - East Side Hub@Harding
 - Como Planetarium
- Dugsiyada sare ee habeenkii
- **Hawlaha qoysaska lagaga qayb-gelinayo arrimaha iskoollada** (Parent Academy, Parent Advisory Council meetings, iwm.)
- **Waa la baajin haddii ay ururro iskuulka ka baxsan ay oggololaansho haystaan in ay dhismaha iskool Saint Paul ah ku qabsadaan shirar ama hawlo.** (YMCA, Girl Scouts, tutoring, iwm.) Kala xiriir qabanqaabiyaha hawlahaan ururka wixii su'aalo ah.

Sababaha loo Baajin karo Hawlaha Iskoolka ka dib ee Cimilada la Xiriira

- Go'aanka baajinta barnaamijyada baxo Iskoolka ka dib waxaa la gaari doonaa ugu dambeyn 12-ka duhurnimo isla maalinka la baajinayo barnaamijyadaas.

*The forecast is determined using information from the National Weather Service | ** Diesel-fueled buses may not start or remain running when air temperature is below -25° F.

Ogeysiisyo ah farriimo ayaa qoysaska iyo shaqaalaha loogu diri doonaa telefoon iyo iimayl ahaan, waxaana lagu qori doonaa bogga iskoolka ee spps.org. Ogeysiisyo ayaa loo diri doonaa warbaahinta maxalliga ah sida telefishinka, jaraa'idka, iyo raadiyowga.